

Maxaa laga filan karaa Degmada King ayadoo Washington si buuxda dib loo furaayo



Adiga

Markay Washington dib u furanto, inta badan xayiraadaha COVID-19 ayaa la qaadi doonaa. Inta badan meheradaha iyo meelaha bulshada oo ay kujiraan maqaayadaha, dukaamada, xafiisyada, tiyaatarada, iyo matxafyada waxay ku noqon karraan sidii ay ahaan jireen ayadoo loo baahneyn in lakala fogaado.

Halka aad u baahan tahay in aad qaadatid af-xirka oo sii wadid kala-fogaanshaha bulshada

| xaruunta | Si buuxda isu tallaalay (laba toddobaad kadib marka aad dhameystirto taxanaha tallaalka) | Qayb ahaan la tallaalay ama aan la tallaalin |
|--|--|--|
| Meelaha dadka badan isugu yimaadaan ee banaanka ah (kulamada banaanka, wadooyinka mashquulka badan ama jidadka yar yar) | | ✓ (marka masaafada lixda fuudh an la ilaalin karin) |
| Meelaha dadweynaha ee gudaha, si guud | | ✓ |
| Meelaha dadweynaha ee gudaha ah ee milkiileyaasha ganacsigu dalbadaan ama faraan xeerka af-xirak qof walba | ✓ | ✓ |
| Isbitaalada, daryeelka muddada-dheer, xafiisyada dhakhtarka, Xabsiyada, hoyga dadka guryo la'aanta ah, iskuulada, ama gaadiidka dadweynaha | ✓ | ✓ |

Dadka si buuxda loo tallaalay way sii wadi karaan in ay qaataan af-xirka haddii ay doortaan, gaar ahaan marka ay ka ag dhawyihiin kuwa aan tallaalneyn, ee qaba xaalado caafimaad, ama carruurta aan weli xaq u laheyn tallaalka. Wali dadkoo dhan lama wada tallaalin, oo ay kujiraan in kabadan 300,000 oo caruur ah, marka qof walba waa inuu sii wadaa inuu raaco tilmaamaha af-xirka ee gobolka iyo waliba tilmaamaha safarka ee CDC.

COVID-19 wali wuxuu ku dhex jiraa bulshadeena. Ilaalinta ugu fiican ee waa in la qaato tallaalka COVID-19. Waa lacag la'aan, ammaan ah oo wax ku ool ah. Booqo boggaga tallaalka bulshada (si joogto ah ayaa loo cusbooneysiyyaa):

www.kingcounty.gov/covid/vaccine/somali.

Ganacsiyada iyo Ururada

Dhammaan ganacsiyada iyo ururada waxay taageeri karaan dib-u-furid nabdoon. Raac tilmaamaha gobolka Washington si aad u ilaaliso shaqaalahaaga iyo macaamiishaada, [iyadoo la raacayo in hawo si hagaagsan usoo gasho gudaha](#), [dadaallada tallaalka](#), [iyo tilmaamaha af-xirka](#). Ganacsiyada iyo ururada kale waxay haystaan xaqa ay kaga dalban karaan macaamiisha iyo shaqaaluhu inay qaataan af-xirka.

Shaqaalaha si buuxda u tallaalan looma baahna in ay qaataan af-xir ama sameeyaan kala fogaansho Meesha shaqada, ilaa iyo inta loo-shaqeeyaha uu dalbado. Laakiin, [Washington Labor & Industries](#) waxay uga baahan yihiin loo-shaqeeyaasha in ay hubiyaan in shaqaaluhu si buuxda loo tallaalay.

Kulamada Waaweyn (10,000 + kaqeybgalayaasha)

Xaqiijinta tallaalka iyo baaritaanka lagu hubinaayo in aadan qabin Covid-19 ayaa lagula talinayaa laakiin waajib kuma aha munaasabadaha waaweyn ee gudaha ama dibadda, sida riwaayadaha, shirarka, iyo kulamada cayaaraha. Ma jiraan wax xadidaya tirada ama shuruudo kala fogaansho ee kulamada banaanka.

Kulamada waaweyn ee gudaha waxay ku socon doonaan ilaa 75%. Haddii kulan u dalbaayo caddaynta tallaalka dhammaan kaqeybgalayaasha, waxay si buuxda dib u bilaabi karaan dhamaan howlahooda iyadoo aan loo baahnayn masaafu kala fogeyn ah. Ka qeybgalayaashu waa inay raacaan shuruudaha af-xirka ee hadda jira.

Hadda ka dib

Degmada King iyo gobolka Washington waxay sii wadi doonaan kormeerka talaalka COVID-19 iyo heerarka caabuqa, iyo sidoo kale dib u eegis iyo dib u qiimeyn lagu sameeyo tilmaamaha iyo xaddidaadaha. Haddii kiisaska si weyn kor ugu kacaan oo ay abuuraan walaac caafimaad ee bulshada, qorshayaasha dib u furista waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiyo hadba sida loogu baahdo.